# Warbixinta Kama Dambaynta ee Guddida Ka Talo Bixinta Furashada Ururada Siyaasadda

Written by ISG (www.soradi.org) Wednesday, 22 June 2011

**I. Murtida Warbixinta:**

Ka dib markii aanu dhagaysanay talooyinka sharciyaqaano xeel-dheer u leh shuruucda dalka iyo shuruucda caalamiga ah ee xuquuqal insaanka, dareenka iyo doonista qaybaha kala duwan ee bulshada JSL, isla markaana dhuuxnay sababaynta ay ku jaan gooyeen doonistooda, sidoo kalena darisnay saamayn ay arintani ku yeelan karto qodobadan soo socda:

- Ka mid noqoshada Somaliland ee Bulshada Caalamka
- Kobcinta hanaanka Dimuqraadiyadeed
- Xuquuqda Aasaasiga ee Muwaadiniinta Somaliland
- Fidinta Maamulka Dawladnimo
- Abuuridda saaxad siyaasadeed oo loo simanyahay
- Dhiirigalinta Dhalinyarada iyo Haweenka ee ka qaybgalka talada dalka

Isla markaana tixgeliney tiradii cododkii laga soo ururiyey muwaadiniinta Somaliland ee ka qaybalay doodihii oo tiradoodu dhammayd 1769 oo qof, una kala baxday sidan: 1002 (haa), 737 (maya) iyo 30 (midna).

**Sidaa awgeed waxa ay talada Gudidu ku soo ururtay in la furo Ururada Siyaasadda doorashada golaha deegaanka ee usoo horeysa. Golahayaasha deegaanka ee wakhtigan joogana waxa aanu ku talinaynaa in la kala diro lana magacaabo maayeero ku meel-gaadh ah.**



**Sawirka Xubnaha Gudida**

**Waxay kale oo Guddidu ku talinaysaa:**

1. In muddo 18 billood gudohood ah lagu hirgeliya doorashada Golayaasha Degaanka soo socda iyo diiwaangelinta ururada siyaasadeedba.

2. In la qabyo tiro Sharuucda iyo Xeerarka Ururada Siyaasadda, Xisbiyada iyo Doorashooyinka.

3. In la dhiso Guddi Joogto ah oo qaabilsan diiwaangelinta Ururada Siyaasadda iyo ilaalinta ku dhaqanka dimuqraadiyada ee xisbiyada gudahooda.

4. In lagu talo galo Kharashyadii ku bixi lahaa Furashada Ururada iyo Doorashooyinka

5. In la sameeyo Xeerkii Xisbiyada Qaranka **(Political Parties' Act)**

6. In la qabyo tiro diiwaangelinta codbixiyeyaasha ee hadda jirta.

**II. <u>Hordhac</u>**

**Waaya-aragnimada Somaliland**

Somaliland 20tankii sannadood ee u dambeeyey waxay la hirdmaysay inta badana ka gudubtay caqabado siyaasadeed oo salka ku haya dhismo dawladnimo iyo hirgelinta habka dimuqraadiga. Waxay ku guulaysatay mataanayntii nabadda iyo dawlad dhiska ee lagu hirgelyey heshiisyadii nabadeed iyo ku dhawaaqistii madaxbanaanida Somaliland ee bilowgii sagaashanaadkii. Waxa iyana ka mid ahaa ku dhaqanka Axdi Qaramaeddkii (beel wax-ku-qaybsiga), iyo yagleelkii tiirarka iyo dhisida hay'adaha dawladnimo, intubana ku hirgaleen muddadii tobanlihii sano ee u horreeyey.

Waxa qarnigii cusbaa ee 2000 la kawsaday qaadashadii Dastuurka Qaranka oo si weyn la isugu raacay 97.8% una bilaabay Somaliland waa cusub oo ku astaysan ku dhaqanka habka dimuqraadiyada oo ay halbowle u ahayd hirgelinta nidaamka xisbiyada badan iyo qabashada doorashooyin isdaba joog ahaa. Doorashooyinka qaarkood oo ay ka mid tahay tii u dambaysay ee madaxtooyda hirgelintoodu, waxaynu ognahay mararka qaarkood in ay khalkhal geliyeen nabadda iyo xasiloonida ay bulshada Somaliland sida weyn u ilaashato. Haddaba iyadoo caqabado badan laga gudbay ayaa haddana qabyo badan oo dhismaha iyo tayeynta hay'adaha dawladnimo iyo ku dhaqanka dimuraadiyaduba ay jiraan oo loo baahanyahay in aan la isdhigan. Waxa ka mid dhamaystirka ku dhaqanka habka xisbiyada badan iyo shuruxcucda la xidhiidha.

**Taxanaha Doodda Furashada Ururada Siyaasadda**

Haddaba waxa shantii sannadood ee u damabeeyey jirtay dood iyo muran ah in la furi karo urur siyaasadeed iyo in kale. Murankaasi wuxu circa isku shareeray markii muwaadiniinta qaarkood ku dhawaaqeen samaynta ururo siyaasadeed sida QARAN uu soo banbaxay, iyadoo loo diiday ruqsada diiwaangelinta, madaxdiisiina xukun maxkamadeed oo xabsi iyo xaq- ka-qaadba lagu

riday. Waxay markaa qadiyadda furista ururada siyaasadeed noqotay arrimaha ugu muhiimsan ee bulshadu xal u doonaynayso. Xisbiga Kulmiye oo keliya ayaa ka jawaabay oo ballanqaaday inay fulinayaan. Ka dib markii uu ku gulaystay madaxweynimada dalka Axmed Maxamed Maxamuud – Siilaanyo, wuxu magacaabay Guddida Ka Talo Bixinta Ururada Siyaasadda.

**Xilka Guddida**

Guddidu waxay ka koobnayd 20 xubnood oo ka kala yimi: Golaha Guurtida JSL, Golaha Wakiilada JSL, Saddexda Xisbi ee Kulmiye, UDUB iyo UCID, Aqoonyahanada, Jaamacadaha, Guddida Xuquuqul Insaanka, Ururada Bulshada, Culimaa'udiinka,Ganacsatada, madaxda dhaqameed, Beelaha laga tirada badanyahay iyo La Taliyeyaal Madaxweyne. Madaxweynuhu wuxuu u xilsaaray Guddida:

1. Cilmi Baadhis (Ra'yi ururin iyo doodo) la xidhiidha rabitaanka bulshada ee ururada siyaasada

2. Ka soo talo bixin baahida sharci ee ku gadaaman Ururada Siyaasada iyo Adkaynta hanaanka Dimiquraadiyadeed ee ka hirgalay Jamhuuriyadda Somaliland.

3. Daraasad ku saabsan Duruufaha siyaasadeed, dhaqaale iyo nabadgelyo ee saameynta ku yeelan kara Ururada Siyaasadda.

**III. <u>Habka Xog-urrurinta iyo Go'aan Qaadashada Guddida (Methodology)</u>**

1. Socdaal ay ku tageen lixda Gobol ee u waaweyn Somaliland: Maroodijeex, Awdal, Saaxil, Togdheer, Sanaag iyo Sool.

2. Dood iyo ra'yi ururin ay magaalo madaxyada goboladaas ka qabteen.

a. Doodahaas waxa lagu casuumay dad laga soo xulay qaybaha kala duwan ee bulshada sida: Madaxdhaqameedka, Culimaa'udiinka, , Aqoonyahanka, Ganacsatada, Jaamacadaha, dhallinyarada, haweenka, iyo guddiyada horumarinta.

b. Xulashada dadka ka qaybgelayay xil weyn bay Guddididu iska saartay intii awoodeeda ah in teel-teel iyo inay war-ma-qabto ahaadaan. Markay u suurtawdo toos ayey u xulanaysay, marar kalena waxay la kaashanaysay madaxda sare ee gobolada, guddiyada horumarka. iyo ciddii ay uga maarmi waydo.

c. Shirar ayaa loo qabanayey qaybaha bulshada kor ku cayiman. Qof walbana waxaa laga buuxinayey foom ay ku qorantahay ujeedada laga leeyahay ra'yi ururinta, iyo su'aal qofka ra'yigiisa lagu waydiinayo in ururada siyaasadda la furhaa in uu yahay: "haa", "maya" ama "midnaba". Waxa kale oo ku qornaa inuu sababeeyo jawaabtiisa iyo inuu talo bixiyo. Waxa dabadeedna loo qabanayey dood furan oo qofkii rabaaba uu ra'yigiisa ku cabbirayey.

d. foomamka codaynta Gudidu goobta kumay tirinayn ee dib bay u dhigatay si aanay u saamayn hawsha oo socota, waxaanay tirisay ugu dambaytii markii halwgalkeeda kale ay dhamaysatay.

e. Guddidu waxay hawsheeda qabanaysay mar walba iyadoo isu dhan kuna wada martay

gobolada oo dhan, marka laga reebo Sool iyo Sanaag oo ay iyaga isu qaybisay si ay wakhtiga u tashiisho.

3. Guddidu waxay hawlgelisay afar qaryaqaan oo ay u diratay in ay talo iyo taxliil sharci ka soo siiyaan arrinta furashada ururada siyaasadeed.

4. Waxay iyana warbixin ay ka dhegeysatay hay'adaha ay ka midyihiin: Komishanka Doorashooyinka Qaranka, Akadhemiga Nabadda iyo Horumarka, iyo Dalladda SONSAF. Waxay iyana ay qoraalo ka heshay dad iyo kooxo isxilqaamay oo dibedda iyo gudaha dalkaba kala jooga.

5. Waxay Guuddidu si kooban u adeegsatay warbaahinta, iyadoo ka soo qaybgeli jirtay furitaanka fadhiyada oo keliya. Haseyeeshee waxa Guddida la socday film-qaadayaal ka tirasn APD oo dood walba bilow iyo dhammaad u duubayey. Waxa halkaa ka soo baxaya filim kaabaya warbixinta Guddida.

**IV. Natiijooyinka ka soo Baxay Xog-uruurinta**

Guddidau waxay dhegeystay dooddii bulshada qaybaheeda kala duwan, waxay tirisay codadkii 1769 qof ee "Haa", "Maya" iyo "Midna" oo ahaa dadkii doodaha ka qaybgalay, waxaanay dhuuxday sababayntoodii iyo talooyinkii ay soo jeediyeen. Guddidu waxa kale oo ay dhegeysatay fasiraaddii iyo taladii sharci ee afarta qaryaqaan u soo diyaariyeen. Waxay ku salaysay warbaahintooda saamaynta ay furida ama furid la'aanta ururada siyaasadeed ku yeelan karto: Hirgelinta dimuqraadiyada, siyaasadda, iyo nabadda Somaliland1[1]. Waxa markaa u soo baxay arrimahan soo socda:

**1. Natiijadaii Codaynta Ka Qaybgalayaasha**

Markii la tiriyey foomamkii laga soo ururiyey muwaadiniinta Somaliland ee ka qaybalay doodaha oo tiradoodu dhammayd 1769 oo qof, waxay u kala baxdey sidan:

| | *Gobolka* | *Haa* | *Maya* | *Midna* | *Total* |
|---|---|---|---|---|---|
| 1: | **Maroodi_Jeex** | 190 | 302 | 11 | 503 |
| 2: | **Togdheer** | 157 | 132 | 0 | 289 |
| 3: | **Saaxil** | 91 | 94 | 5 | 190 |
| 4: | **Sanaag** | 208 | 66 | 2 | 276 |
| 5: | **Sool** | 185 | 39 | 9 | 233 |
| 6: | **Awdal** | 171 | 104 | 3 | 278 |
| | ***Total:*** | ***1002*** | ***737*** | ***30*** | ***1769*** |

1[1] Guddida umay suurogelin in ay natiijo mug leh ka hesho saamaynta dhaqaale. Qarash dheeraad ah ayey furista ururadu keenaysa ayaa Komishanka Doorashooyinka Qaranku yidhi, laakiin qiimayn qorshaysan oo lagu kalsoonaan karo lama soo bandhigin. Isla markii waa in la sugo intee in le'eg ayuu dabooli doonaa deebaajiga laga qaadayo ururada.

Halkaas waxaa ka muuqda in bulshada aanu waraysanay rabitaankeedu u batay in Ururada Siyaasada la furo sida ka muuqata shaxada sare.



**2. Soo Jeedinta Sharciyaqaanada oo kooban**

Inkasta oo gunaanadka ama ururinta talo-bixinta garyaqaannadu ay ku kala duwan yihiin jawaabta kama dambaysta ah oo laba iyo laba “Haa” iyo “Maya” ugu kala qaybsameen, haddana waxay ka midaysan yihiin dood-sharciyeedka ay soo wada mareen taas oo lagu soo ururn karo:

1. In xuquuqda asaasiga ah ee distoorku cayimay, gaar ahaan xaqa doorashada iyo is- abaabulka siyaasadeed iyo ka qaybqaadashada hawlaha siyaasiga ah (qod.22aad iyo 23aad) ee muwaaddinka ay ahmiyadda kowaad leedahay, isla markaana, hirgelinta xuquuqdaas ay tahay waajib saran dawladda Somaliland-( xeerdejinta, fulinta iyo garsoorkaba.)

2. In fasiraadda qodobadaas (qod.21aad) ay waajib tahay in loo raaco xeerarka caalamiga ah sidaa Baaqa Xaquuqda Adamaha iyo Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Siyaasadda iyo Madaniga ah, kuwaas oo mar kale ku xusan qod. 10aad ee distoorka. Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Siyaasadda iyo Madaniga ah waxa uu si cad u qeexayaa qod.17aad. “ Xaqa dadku u leeyahay in ay isu taagaan doorasho looma xadidi karo si aan maangal ahayn oo ku khasbaysa musharrixiinta inay xubin ka ahaadaan xisbi ama xisbiyo sii cayima (specific Parties). Sidaa darteedna ay noqonayso lama huraan mandiqi ah in wax kasta oo is hortaagaya hirgelinta iyo xaqiijinta xuquuqdaas ay sharci darro ku sifoobayaan”

3. In qod.9(2) ee distoorku uu carqalad ku yahay si toos ahna uga soo horjeedo

(a) Nidaamka Xisbiyada badan iyo hannaadka dimuqraaddiyadda

(b) Xuquuqda iyo xorriyaadka asaasiga ah ee muwaaddiniinta.

Sidaa darteed ay daruuri noqonayso in la beddelo qod.9aad.faq.2aad si loo mideeyo distoorka. Haseyeeshee, inta ka horraysa, waxa waajib ah khilaafka sharci ee ka dhalanaya qod.9/2 iyo qodobbada ee kale distoorka xalkooda iyo fasiraaddooda in loo raaco sida uu dhigayo qod.21aad.

4. In Xeerka Nidaamka Xisbiyada uu leeyahay goldaloolooyin farabadan oo aanu ku fillayn hugaaminta iyo nidaaminta Xisbiyada siyaasadeed. Sidaa darteed loo baahan in la abuuro Xeerka xisbiyada oo dhammays-tiran

5. In Guddiga Qaranka ee Diwaan-gelinta Xisbiyada oo waajibkeedu yahay kormeerka Xisbiyada iyo hubinta in xisbiyadu u dhaqmaan sifo sharci ah ay meesha ka mqan tahay sidaa darteedna loo baahan yahay in Guddigaas si sharci ah lagu abuuro waajibaadkeedana la qeexo.

**3. Saamaynta Furista Ururada Siyaaasaddu Ku Leedahay:**

**3.1 Hergelinta Dimuqraadiyadda Somaliland**

a. **Furista ururada siyaasadu waxay lagama maarmaan u tahay sinaanta muwaadiniinta ka qaybgalka siyaasadda, ku dhaqanka mabda'a xisbayad badan iyo guud ahaanba xoojinta geeddisocodka dimuqraadiyadda ka hirgashay Somaliland.**

Dooddii ka qaybgalayaasha intooda badan waxa ka soo baxaysay ururada oo la furaa waxay ula mid tahay xoojinta iyo taabbogelinta hanaanka dimuqraadiga ee Somaliland iyo in muwaadiniintu fursado siman u leeyihiin ka qaybgalka siyaasadda. Waxa ay markaa raacinayeen in haddii aan la furin "koote" siyaasadeed abuurmi karto, oo halkaa uu ka dhalan karo, hab digtaatoori ahi.

**b. XIsbiyada Qaran ee jira tayadooda waa la dhaliilay,ku dhaqnaka dimuqraadiyadda gudahoodana aadbaa loo saluugsan yahay.**

Arrintaa dadka qaar waxay u arkeen in iyagoo la tayeeyo lagaga bixi karo tayoxumadooda, halka kuwo kalena leeyihiiin waxay noqodeen hanti dad gaar u xidhan oo aan dadka oo dhan u sinayn. Haddaba, waxay labada dhinacba ka sinaayeen siday uga warwarsanayihiin ku dhaqanka dimuqraadiyadda gudahooda,iyo sida joogtaynta shiraraka mudaysan ee Guddiyada Fulinta, Golaha dhexe iyo Shirweynahaba; iyo guud ahaan taladii oo ku soo ururtay Guddoomiyaha Xisbiga.

c. **Muhimadda tartanka siyaasadeed**

Waxa xoog looga dhawaajiyey muhimadda tartanku u leeyahay korriinka iyo kobaca xisbiyada siyaasadeed iyo hirgelinta dimuqraadiyadda. In lafuraa ururada waxay lagama maamaan u tahy in tartan xor ahi uu saaxadda siyaasadda Somaliland ka dhaco oo cidna aan xisbi u xdhnaan.

**d. Waxa maqan kormeerkii iyo ku- ilaalinta xisbiyada, ku dhaqanka habka dimuqraadiga iyo**

**fulinta sharciyada u dagsan.**

Markii Guddidii Diiwaangelinta Ururada lix bilood ka dib xilku ka dhammaday, cid dambe oo si gaar ah ugu xilsaaran kormeerka xisbiyada iyo la socodka ku dhaqnaka dimuqraadiyadda gudahooda ma jirto. Hay'adaha xilka guud ee qaran haya sida Fulinta, Baarlamaanka iyo Garsoorka oo iyana aan arrinta daba gelin mooyane.

**e. Goldaloollo sharci oo badan baa jira kuwaas oo caqabad ku ah geeddisocodka dimuqraadiyadda Somaliland.**1[2]

Haddaba, waxa aad uga soo baxday dhinacyada doodda in goldaloolooyin sharci oo badani ay jiraan, kuwaas oo caqabad ku ah geeddisocodka dimuqraadiyadda iyo korrinka hay'adaha dimuqraadiga ee xisbiyada qaran ka midyihiin. Waxaa carabka lagu dhuftay: Qodobada khuseeya ee Dastuurka, goldaloolada sharciga Xisbiyada iyo kuwa doorashooyinkaba. Waxay goldaloolooyinkaa sharci sababaan dib-u-dhaca doorashooyinka, muran joogto ah oo aan la isu garaabayn, dhinac walbana isla saxsan yahay iyo inay dhici karto in tartanku murgo lana kala bixiwaayo haddii la isqabto.

**f. Dimuqraadiyaddu waa kaadhka ugu muhiimsan ee aqoonsi doonkaSomalaind.**

Waxa iyana soo baxaysay in dad badani xuseen in arrinta ururada furistoodu ay saamayn ku leedahay aqoonsi doonka Somaliland. Waxa laga dhawaajiyey in ay dimuqraadiyaddu tahay waxa ugu weyn ee aynu ka iibinayno dunida aynu aqoonsiga ka doonayno. Waxa halkaa ku jirta markaa in ururada furistoodu ay geedisocodka dimuqraadiyadda sii xoojinayso isla markaasna ay muujinayso bisaylka ay gaadhay bulshadu sidaa darteedna ay aqoonsiga wax-ka tarayso.

**3.2 Siyaasadda Somaliland**

**a. Albaab siyaasadeed ayuu arrinakani u furayaa bulshada Sool iyo Sanaag Bari.**

Kullanadii Gobolada bari waxa ka soo baxay in ay doodda furista ururadu ay albaab siyaasadeed oo wada hadal iyo ka qaybgalba ah ay u furayso beelaha Sool iyo Sanaag Bari iyagoo ku qarnaqsanaya in aanay kaalin wax-ku-ool ah ku lahayn xisbiyada qaran ee hadda jira, iyo sida ay u samaysmeen midna. Waxa xusid mudan in dad aad uga badan intii la filayey ay kullankii Guddida uga soo baxeen Laas Caanood kuna doodeen in ay kaalintoodii siyaasadeed ku hananayaan ururada oo la furo. Sidoo kalena kulankii Ceerigaabo dareen kaas oo kale ayey ka muujiyeen. Waxa kale oo labadaa gobol ee bari kasoo baxay in ay qabaan in xisbiyada jiraa galbeed ka raranyihiin oo saamayn siyaasadeed aan barigu ku lahayn – kuna doodeed Burco in ay galbeed iyaga u tahay.

**b. Murrugga Diiwaangelinta iyo habka Doorashooyinka ku jira**

Waxay walaac ka muujiyeen ka qaybgalayaashii doodaha Guddidu qabatay , sida diiwaangelinta codbixiyaha jirtaa ay u leedahay goldaloolooyin badan; in ay jiraan dad hal kaadh in badan haysta oo codeeye iyo in dad badan oo xaqa codaynta leh oo aan kaadh haysani jiraan. Waxa

iyana in la isdultaago mudan sida la isu waafajinayo in qasab ay qofka ku tahay in uu ka codeeyo goobtuu iska diiwaangeliyey iyo dhaqanka reer guraagga ee roobka raacaya amaba ka kulaylaha xeebaha looga guuro xagaagii.

**c. Dhallinyarada fursad siman uma helaan in ay u tartamaa siyaasadda**

Qodobo shuruucda dalka ka mid ah ayaa da'da ku takoora dhallinyarada oo kaga horjoosada in ay u tartamaan siyaasadda. Arrintani waxay salka ku haysaa mabda'a u sinaan la'aanta fursadaha lagu tartami karo, ha ahaato saaxadda xisbiyada oo furan ama keli-istaagga oo banaanba.

**d. U sinaanta fursadaha tartan waxa ka mid ah iyaddo la oggolaado keli-istaagga madaxa banaan.**

Doodayaal door ah ayaa arrinkaa soo jeedinayey, in kasta oo aanay tiradoodu badnayn.

**3.3 Nabadda Somaliland:**

a. Waayo-aragnimadii 1969 ee Somaliya waxay dad badan ku reebtay baqdin ah in tirada ururada iyo xisbiyada siyaasadeed ay faraha ka baxaan oo reer waliba mid gooni ah samaysto.

Baqdintaasi waxay leedahay dhawr weji sida: a) in qaba'ilki sii sarifmaan oo qolo waliba urur samaysato markaa tafaraaruq iyo deganaansho darro dacdo. b) In ay dadka nacsiiso dimuqraadiyada markay tayo yeelanweydo oo dabadeedna sidii 1969 ay fududayso in diktaatooriyadi soo baxdo. c) In ururo xag-jir ah iyo qaar Somaliland diid ahiba ku soo dhuuntaan.

Haddaba dhinaca kalena waxa iyana doodaha ka soo baxaysay in urur qabiil aanu ku guulaysan karin in uu xisbi noqdo; waxa kale oo iyana la xusay in Distoorrka Somaliland qodobkiisa 9 (3) reebayo in xisbi iyo urur midna lagu dhiso gobolaysi iyo qabyaalad. Waxa iyana la xusay sida shuruudaha iyo dabarada ku jira xeerarka iyo guud ahaanba hawlgalka Guddida Diiwangelintuba ay u hubinyaan in lagu dhaqmo distoorka iyo shuruucda Somaliland.

b. Waxa kale oo xusid mudan in ay nabadda waxyeeli karto haddii loo sinaan waayo ka qaybgalka siyaasadda iyo doorashooyinka oo qayb bulshshada ka mid ahi ay dareento in ay dibedda ka taagantahay, gaar ahaan dadka badan ee hunguriga siyaasadeed leh ee aan xisbiyada hadda jira midna ku jirin.

**V. <u>Gabagabo iyo Talo Bixin</u>**

Ka dib markii ay Guddidu dhegeysatay talooyinka sharciyaqaano xeel-dheer u leh shuruucda dalka iyo shuruucda caalamiga ah ee xuquuqal insaanka, dareenka iyo doonista qaybaha kala duwan ee bulshada JSL, isla markaana dhuuxday sababaynta ay ku jaan gooyeen doonistooda, sidoo kalena deristay saamaynta ay arrintani ku yeelan karto qodobadan soosocda:

- Ka mid noqoshada Somaliland ee Bulshada Caalamka

- Kobcinta hanaanka Dimuqraadiyada.
- Sugidda xuquuqda aasaasiga ah ee muwaadiniinta Somaliland
- Fidinta Maamulka dawladnimo
- Abuurista saaxad siyaasadeed oo loo simanyahay
- Dhiirigelinta Dhalinyarada, Haweenka ee ka qaybgalka talada dalka

Waxay Guddidu ku talinaysaa:

1. In la furo Ururada Siyaasadda doorashada golaha deegaanka ee usoo horeysa, Golayaasha deegaanka ee hadda joogana waxa ay ku talinaysaa in la kala diro lana magacaabo maayeero ku meel-gaadh ah.
2. In muddo 18 billood gudohood ah lagu hirgeliyo doorashada Golayaasha Degaanka soo socda iyo diiwaangelinta ururada siyaasadeedba.
3. In la qabyo tiro Shuruucda iyo Xeerarka Ururada Siyaasadda, Xisbiyada iyo Doorashooyinkaba.
4. In la dhiso Guddi Joogto ah oo qaabilsan diiwaangelinta Ururada Siyaasadda iyo ilaalinta ku dhaqanka dimuqraadiyada xisbiyada gudahooda.
5. In lagu talo galo Kharashyada ku baxaya diiwaangelinta ururada siyaasadda iyo Doorashooyinkaba.
6. In la sameeyo Xeerkii Xisbiyada Qaranka (Political Parties' Act)
7. In la turxaan saaro diiwaangelinta codbixiyeyaasha jirta.

**WBT**

**Guddida Ka Talo Bixinta Ururada Siyaasadda JSL**

**Hargeysa, 7 Juun, 2011.**

---

**LIFAAQA-1**

**Soo jeedino ku waajahan Turxaan-tirka Saamaynta Furista Ururada Siyaasadeed**

1. Qodobka 9(2) ee xadidaya 3 da xisbi inta si laga yeelayo, waxaa la yeeli karaa in wareeggii walba ee doorashada golaha degaanka la diiwaangeliyo ururada siyaasadda, iyagoo xisbiyadii hore u soo baxayna ay ku jiraan.

3. In shuruudaha ay buuxinayaan ururadu si loo diiwaangeliyo ay saldhig u tahay in ay aaminsanyihiin madaxbanaanina Somaliland; midnimada dalka iyo israacsanaanta dhul-ahaaneed sida ku cad distoorka iyo sinaanta iyo xuquuqda aadamaha.

4. In ay lixda Gobol-doorsaho mid walba ka soo sejilaan tiro xubnahooda ah 2000 (oo ah afar lab inta Xeerka Lr. 14 ku cad) oo ah codbiyeyaal diiwaanshan ah, soona bandhigaan kaadhadhkooda lana hubiyaa in codbixeye kasta urur keliya uu ka diiwaan-gashanyahay.

5. In ururku kasta oo doonaya diiwaangelin uu dhigaa deebaaji aan celin lahayn oo haddana aan

xujo lagama gudbaan ah ku noqonayn muwaadiniinta himilada siyaasadeed oo macquul mandaqi ah. Deebaajigaasu wuxuu wax ka daboolayaa kharashka maamulka diiwaangelinta ku baxaya. Waa laa korhin karaa intii ku caddayd Xeer Lr 14 oo waxa laga dhigikaraa (US$10,000; halkay markii hore ka ahayd 5 malyan oo Shilin). Xisbiyada Qaranka ee jiraa deebaajiga iyana way bixinayaa.

5. In Guddida Diiwaangelintu soo saaraan liiska kama dmabaynta ee ururda tartmaya oo ku wada jiraan, ururadii buuxiyey shuruudaha diiwaangelinta iyo saddexdii xisbi ee jiray. Saddexdii xisbi ee jiray shuruud kuma aha in ay iyagu tiro xubno ah ka keenaan gobol walba.

6. Haddii saddexda xisbi ee jira kulligood ama qaar ka mid ahi ay noqon waayaan kuwa ku guulaystay xisbi qaranniada, maxaa laga yeelayaa xubnahoodii la doortay?

a. In Xubnahoodii Golaha Wakiiladu ay ku fadhiyaan si “madaxbanaani ah”, iyagoo ay ka reebantahay in ay xisbinimo isu abaabulaan; ama ay ku biiraan mid uun xisbiyada soo baxay.

b. Madaxweynaha iyoMadaxweyne-ku-Xigeenka iyagu mid uun xisbiyada soo baxay ayey ku biirayaan, haddii koodii laga soo doortay uu dhaco.

7. Dib-u-eegista Distoorka (Constitutional Reform): si arrintan loo fuliyo waa in la abuuraa Guddi Dib-u-eegista Distoorka, ama loo xilsaaraa Wasaaradda Caddaaladda si loo hirgeliyo daraasad ku saabsan qabyo-tirka distoorka.

**LIFAAQA-2**

**<u>MAGACYADA GUDDIDA</u>**

1. Xildhibaan Sh. Maxmuud Xirsi Faarax
2. Xildhibaan Saleebaan Yuusuf Cali Kore
3. Keyse Xasan Cige
4. Canab Cumar Ileeye
5. Cabdillaahi Siccid Dheere
6. Xasan Xuseen Cod-yare
7. Barkhad Jaamac Xisri
8. Prof; Xuseen Xasan Guuleed
9. Dr. Maxamed Cismaan Fadal
10. Maxamed Cabdillahi Du’aale
11. Amina Cabdilahi Axmed

12. Khadar Nuur Aw Cabdi
13. KaltuumSh. Xasan Cabdi
14. Jaamac Maxmuud Cigaal
15. Sh. Almis Sh. Yahye
16. Suladaan Axmed Daahir
17. Dr. Maxamed Rashiid Sh. Xasan
18. Maxamed Muuse Abees

**LIFAAQA- 3**

*Gogoldhig Date: ___________*

***Gudida ka tala-bixinta Ururada siyaasada waxaa loo xilsaaray***:

- Cilmi baadhis ra'yi ururin iyo doodo la xidhiidha rabitaanka bulshada ee ururada siyaasada
- Ka soo talo bixinta baahida sharci
- Daraasad ku saabsan duruufaha siyaasadeed, dhaqaale iyo nabadgalyo ee ku gadaaman.

***Muwaadin adoo fikirkaaga cabiraya ka jawaab su'aalahan soo socda***

1. Ma kula tahay in la furo ururo siyaasadeed doorashada soo socota

   Haa Maya Midnaba

a) Sababee

a.1)______________________________________________________________

a.2)______________________________________________________________

a.3)______________________________________________________________

1. Talabixin kooban

a)________________________________________________________________

b)________________________________________________________________

**Gudoomiyaha Gudiga**.
Mr. Suleiman Ali Kore -------------------------------

---

1[2] Waxa taabbogalka habka dimuqraadiga tiir-dhexaad u ah in uu dalka ay ka hirgasho ku dhaqanka sharci oo si siman loogu kala bixi karo (Rule of Law).